

## Aqoonsiga dadka cusub Aadka u wanaagsan

Maajo 08, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dadka reer Alberta waxa lagu martiqaadaya inay magacaabaan qof cusub oo wax weyn ku soo kordhiyey bulshadooda.

Alberta waxay hoy u tahay dad iyo qoysas ka soo jeeda asalyo kala duwan waxayna gacan ka geystaan sidii ay saamayn wanaagsan ugu samayn lahaayeen bulshadooda. Abaalmarinta Aqoonsiga Dhawaan Soogalayaasha Alberta waa fursad lagu sharfayo dadka cusub ee ku kobcinaya gobolka iyada oo loo marayo waxqabadyo iskaa wax u qabso ah, hoggaaminta, hal abuurnimada ganacsiga, guulaha ay ka gaareen tacliintooda ama xirfadahooda ama abuurista bulshooyin soo dhaweyn leh oo loo dhan yahay.

Dadka reer Alberta waxay hadda awoodaan inay soo gudbiyaan magacaabiddooda ku aaddan Abaalmarinnda Aqoonsiga Dhawaan Soogalayaasha Alberta. Qaybaha abaalmarintu waxay aqoonsadaan guulaha dhalinyarada, haweenka, waayeelka, ganacsatada, aqoonyahannada, xirfadlayaasha iyo dhisayaasha bulshada. In ka badan hal qaate ayaa laga yaabaa in lagu abaalmariyo qayb kasta.

"Dadka cusub waxay Alberta u keenaan xirfado cusub, aragtiyo, iyo tamar; waxay bilaabaan ganacsi, gacan ka geystaan joogteynta warshadaha muhiimka ah waxayna ka qaataan door firfircooni xaafadahooda, dugsiyada iyo goobaha shaqada. Waxay ku daraan kala duwanaansho iyo firfircooni dhaqameed. Waxaa muhiim ah in aan waqtii ku qaadano in aan aqoonsanno iyaga, dhib ma leh marka ay halkan yimaadaan, waxqabadkooda muhiimka ah si ay bulshadeenna u wanaajiyaa."

*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada kala duwan*

Soo gudbinta waxaa lagu qiimeeyaa iyada oo lagu salaynayo shuruudaha sida guud ahaan wax ku biirinta qofka la magacaabay, sida ficilladoodu u buuxiyeen baahi iyo saamaynta ay kuwa kale u yeeshen, iyo sida ay u muujiyeen hoggaaminta iyo asalka marka la xalinayo dhibaatada.

Magacaabistu waxay furan tahay ilaa duhurnimada Juun 20.

Barnaamijka abaalmarintu waa mid ka mid ah hindiseyaal badan oo dawladeed oo lagu taageerayo dadka cusub ee doortay inay Alberta ka dhigtaan gurigooda.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- Abaalmarinnada waxaa ka mid ah sagaal qaybood: Wax ku biirinta Xirfadda iyo Tacliinta, Ruuxiga, Ganacsiga, Goobaha Shaqada ee Loo Dhanyahay, Horyaalka Cusub, Abaalmarinta Ruuxiga Sare, Kobcinta Bulshada Yaryar, Dhiirigelinta Ardayga, Saamaynta Dadka Cusub ee Haweenka iyo Hogaamiye Da'yar.
- Magacaabista waa in lagu soo gudbiyaa bogga internetka.
- Si aad xaq ugu yeelato, dadka la magacaabayo waa inay:
  - shaqsi ahaado (ma aha koox ama urur)
  - aadan helin abaalmarin la mid ah Dowladda Alberta
  - ku dhashay meel ka baxsan Kanada (laakin waxaad Kanada ku noolaan kartaa sanado badan)
  - aad tahay qof deganaanshaha rasmiga ah ama muwaadin Canadian ah
  - aan lahayn xukun dambi ah oo aan cafis lagu helin
  - aadan noqon masuul la doortay
  - aad degan tahay Alberta wakhtiga magacaabista
  - wax ku darsaday Alberta

## Xogta la xiriirta

Abaalmarinta Dadka Cusub ([Newcomer Awards](#))

## Warbaahinta kala duwan

Fiidiyow ([Video](#))

## Weydiimaha warbaahinta

[Michael Kwas](#)

780-264-5368

Xoghayaha Warfaafinta, Socdaalka iyo Dhaqamada kala duwan